HIV/AIDS: Ma Mushkilad Kanada ka jirta baa ?

Waxaa Qorey: *Kristin Mason*

Kanada oo markii dhulbalaar ahaan la eego ah wadanka labaad ee ugu weyn dunida marka laga reebo Ruushka, ayaa waxaa ey ku taalaa Waqooyiga Qaarada Ameerika, ayadoo xuduudda koonfureed la wadaagta dalka Mareykanka. Inta kale waa dhul go'an, Kanada oo cabir ahaan ah 8,893 kiiloo mitir ayaa waxa kaliya oo ey xuduud dhul ah la wadaagtaa dalka Mareykanka.

Dhul go'naanshahaas ayaa Kanada u hogaamiyey iney yeelato taariikh nabadeed, ayadoo mar walba oo colaadi ku timaadona ey lug ku lahaayeen ajaanib iyo dagaalo dowladeed, ee aaney jirin marna wax dagaal sokeeye ah, Kanada waxay ugu danbeyn bishii Diseenbar 1931dii ka heshey ictiraaf rasmi ah dalka Boqortooyada Ingariiska, ayadoo noqotey dowlad baarlamaani ah oo dimuqraadi ah.

Cudurka

Faafidda uu cudurakani ku faafaayo dalka Kanada ayaa lagu qiyaasaa in ey tahay 0.3% (2003) taas oo ka dhigeysa dalka kanada in uu ku jiro kaalinta 89aad oo ee ey iskula jiraan 168 wadan oo kale (CIA FACT BOOK). Waxaa ku nool dalka Kanada ugu yaraan dad ka badan 34 malyan oo qof, waxaana lagu qiyaasaa dadka cudurkan HIV-ga qaba in ey yihiin 63,604 qof, dadkaas waxaa qaan gaar ah 59,522 qof oo jira ama 15 sano ama ka kor. Markii loo qeybiyo lab iyo dhedig waxaa la dhihi karaa in 83.1% oo ah Kanadeyska qaba HIV waa rag, halka ey dumarku ka yihiin 16.9% (1da November 1985 – 30kii June 2007).

Tirada dadka lagu sheegey iney qabaan cudurkaan wey soo yaraatey ilaa ey ka gaartey meeshii ugu yareyd oo ahayd 2,104 xaaladood (2000), ayadoo markaas ka dib ey kor u kacdey tiradaasi, Xaaladaha la soo sheego ee ugu badan waxaa ey yihiin Rag u tagey ama u galmoodey Rag kale (MSM) oo gaareysa 41.2%, ayadoo ey kaalinta labaad soo galayaan dadka isticmaala mukhaadiraadka lagu duro xididada oo ey tiradoodu tahay 22.8% qaangaar, (Ayadoo laga soo xigtey waaxda Caafimaadka Mujtamaca ee Kanada June 2007). Dumarka qaan-gaarka ah ee khatarta ugu jira in uu ku dhoco cudurkani waa kuwa isticmaala daroogada lagu duro xididada ayadoo lagu qiyaasey 41.1%, ayadoo sidoo kale ey soo raacaan dadka Shahwadda u qabato labka iyo dhedigga oo u galmooda labadaba oo tiradoodu tahay 21.9%.

Gobollada iyo Dhulka Kanada ee gaaraya 13ka gobol ayaa afarta ugu waaweyn eek ala ah (Ontario, Quebec, British Columbia iyo Alberta) ayaa waxaa ku nool 94.3% dadka qaba cudurka HIV ee ka mid ah ummada ku nool Kanada, Ayadoo isku dar 81.7% dadka qaba HIV ey yihiin Kanadiyaanka Cadcad (Caucasian Canadians).

Tirikoobkaan ayaa si waadix ah u cadeynaya in ragga cadcad (Caucasian Men) ey raadsanaan in ey la galmoodaan nin kale, kuwaas oo inta badan ku nool magaalooyinka ugu dadka badan ee dalka Kanada.

**(Tirikoobka ku saabsan xogta Dadkaas waxaa laga heley Statistics Canada: Canada's National Statistics Agency, Xogta ku saabsan dadka qaba AIDSkana waxaa laga heley waaxda Public Health Agency of Canada report "HIV and AIDS in Canada").*

Tallaabada Dowladda

Bishii Oktoobar 2005tii ayaa Dowlada Federaalka ahi soo saartey qorshe soconaya shan sanadood oo loo bixiyey "Aan isla Hogaaminno: Kanada waxay ka hor tagi doontaa HIV/AIDS (2005-2010). Kanada waxay ogtahay in ey muhiim tahay in lala dagaallamo AIDSka si caalami ah, iyo si daakhili ahba, taas oo ka mid ah hadafka qorshahaan, Ahdaaftaas waxaa loo dajiyey in la gaaro talaabooyin lagu yareynaayo in cudurkaani sii fido.

Qorshaha dowladda Federaalka ahi wuxuu ku saleysan yahay shan talaabo oo ku jirta qorshahooda oo kala ah: barnaamijka iyo siyaasada wax kaqabasho, sare u qaadista aqoonta, xiriirka iyo wacyi galin mujtamaca, xiriirin, qorsheyn, qiimeyn iyo warbixin, iyo waliba xiriir caalami.
Kanada waxay ka warqabtaa in qadiyadda ugu weyn ee soo waajaheysa caalamka ey tahay AIDS-ka, ayadoo ey qadiyadahaas ka mid yihiin: in la joojiyo yassida iyo iskala-sooca lagu hayyo dadka qaba cudurkaas, in dhaqsoba looga baaro qofka cudurkaan oo dhaqso loo daweeyo, in la helo qaab la iskaga ilaalin karo cudurkaan, iyo in la sii wado dadaalka loogu jiro in cudurkaan loo helo daawo. Waxaa muhiim ah in dadka wax la baro, Mar la sameeyey qiimeyn cilmiyeysan ayaa waxaa la ogaadey in 17% dadka Kanadeyska ahi ey aaminsan yihiin in hadii qofka lagala tacaalo HIV goor hore ey fududdahay in cudurkaan laga dawoobo (Leading Together).

Markii la eego Caalamka ahaan, Kanada waxay ka qeyb qaadatey baaritaano lagu sameeyey AIDS-ka, sanadkii 2003 Caafimaadka Kanada (Health Canada) iyo Waaxda Caalamiga ah ee Horumarinta (Canada International Development Agency) iyo waliba kooxo kale oo ey ka mid yihiin UNAIDS waxay soo saareen baaq loogu magac darey Baaqii Waarsow (Warsow Declaration), kaas oo qorshe u ah in la joojiyo faafista uu cudurkaan HIV ku dhex faafo dadka isticmaalada daroogada lagu mudo xididdada, sidoo kale Kanada waxay u qumtey in ey si toos ah u taageerto United Nations General Assembly Special Session (UNGASS) oo ey ka taageerto barnaamijka HIV/AIDS.

Kanada sidoo kale waxaa ka go'an iney mideyso dhamaan dadka dagaalka kula jira cudurkaan, hadii ey ahaan lahaayeen Dowladda, Hey'adaha, dadka u dooda xuquuqda bini'aadmiga, iyo waliba Cilmi-baareyaasha, si ey u noqdaan gacan qura, sanadkii 1998dii ayey ahayd markii la asaasey istiraatiijiyadda kanada ee ku aadisan HIV/AIDS oo marka la soo gaabiyo loo yaqaano (CSHA) ama Canadian Strategy on HIV/AIDS.

Dadka Asalka ah (Aboriginal)

Sida ey sheegtey (Health Canada), dadka asalka ah ee Kanada oo iskugu jira (Inuit iyo Umadihii hore) waxa ey yihiin 3% dadka ku nool Kanada, laakin marka la eego halka ey kaga jiraan dadka qaba AIDSka waa 15.4% waana baaris la sameeyey bishii June ee 2007, tiradaas waxaa laga reebey 70 qof oo la kala cadeyn waayey asalkooda.

Sababaha keentey in uu cudurkani ku dhex fido dadkaas ayaa waxaa u horeeya faqriga, iyo daroogoda iyo khamrada saa'idka ah, iyo waliba daryeelka caafimaad oo aad ugu yar bulshada, iyo ka tagid dhaqankii iyo hiddihii ey lahaayeen oo dadka ku dhaqmaa ey yaraadeen (Leading Together). Sanado ka dib ayaa waxaa bilowdey dadka u qumey iney wax ka qabtaan dhibaatooyinka soo foodsaara dadka asalka ah.
Dadkaas ama kooxahaas waxaa ka mid ah faracyo ey leedahay dowladda federaalka ahi oo ey ka mid yihiin (Health Canada's First Nations and Inuit Health Branch, iyo Public Health Agency of Canada's National Aboriginal Council on HIV/AIDS), waxaa kale oo jira kooxo kale oo ey ka mid yihiin (Canadian Aboriginal AIDS Network) oo ah urur kheyri ah.

Nidaamka Jeelasha

Sida ka jirta dalal badan oo dunida ah, waxaa la og yahay in fididda cudurka HIV ey aad ugu badan tahay in lagu kala qaado jeelasha dhexdooda, markii loo eego bulshada ku nool banaanka, in kastoo in daroogo la isticmaalo ey mamnuuc ka tahay jeelasha dhexdooda iyo banaankoodaba, hadana waxaa jira in ey dadka jeelka ku jira helaan daroogada oo ey isticmaalaan, sidoo kale waxaa sahla in uu cudurkani ku dhex fido jeelasha ayadoo eysan jirin wax nadiif ah oo la soo mariyey jeermis dile, taas oo markii ey isku dhigayaan Tattoo-ga uu fido cudurkani.

Dowlada Kanada kuma dhaqanto nidaamka loo yaqaan Kala Badalashada Irbadda, kaas oo la sheegey in uu yareeyey fididda HIV, dalalka sheegtey in nidaamkaas yareeyo fidista cudurkan ayaa waxaa ka mid ah Switzerland, sababta eysan Kanada ugu dhaqmin nidaamkaas ayaa ah in Irbad Kala Badalashadu ey tahay in dowaladu ogolaato isticmaalka daroogada aan sharciga ahayn.

*Sababta sadexaad ee keenta in cudurkani ku dhex fido jeelasha ayaa ah Galmada, lama oga wali inta maxbuus ee isku galmooda, laakiin markii la qiyaasey waxaa lagu sheegey in ey gaarayaan 6% (2005). Ayadoo ey jiraan in ey maxaabiistu heli karaan Kondom hadana in badan ayaan isticmaalin. *(Xogta ku saabsan Xabsiyada waxaa laga heley AIDS Calgary Awareness Association iyo waliba Canadian HIV/AIDS Legal Network).*

Ka Gudub Fikradihii Hore

Sanado ka hor wuxuu AIDS-ku la yimid faafid, sidoo kale wali bulshadu waxay u aragtaa in uu yahay iin iyo ceeb, waxaa kale oo jira dad aaminsan in cudurkani yahay mushkilad ka timid Afrikaanka, iyo cudur ku dhaca dadka khaniisiinta ah, laakin waxaa run ah in cudurkani yahay cudur caalami ah oo aan kala aqoon sinjiga qofka, kalarkiisa, wadankiisa, da'diisa, iyo shahwadiisa.

Sidoo kale mushkiladda AIDS-ka ee Kanada aad ayey ugu yar tahay tan heysata qaaradda Afrika, laakiin waxaa jira in cudurkani uu wali ku fidaayo dalkan Kanada, ayadoo dadka qaba cudurkaan ey la kulmaan in bulshadu takoorto. Waxaa kale oo jira in ey dadku ka baqaan in ey is baaraan ama is daweeyaan taas oo sahleysa in ey badato dadka u dhinta cudurkaan.

Gababa-gabada Dagaalka

Kanada waxay hore u qaadatey talaabo muhiim ah oo qeexeysa in cudurka HIV/AIDS uusan ahayn mushkiladda kaliya ee ka jirta dalka, laakin ey tahay in la joojiyo faafinta cudurkan uu ku faafayo dunida oo dhan. Taas oo cadeyneysa in xataa Kanada ey soo qaadato dadka magan-galyo doonka ah ee qaba cudurkaan, kuwaas oo laga keeno wadammo u cudurkaan aad ugu baahsan yahay.

Fakhrigu waa sababaha ugu badan ee uu ku faafo cudurkani, waxaana ugu badan dadka daroogada isticmaala dadka aadka faqriga u ah, oo waliba noqda dad ka ganacsada Galmada. Waxaa muhiim ah in barnaamijyada bulshada lagu jiheeyo si ey wax ugu qabtaan dadkaas.

Waxbarashadu waa waxa ugu muhiimsan ee lagu joojin karo fidista cudurka AIDSka, waxaa muhiim ah in dadka la baro sida uu ku fido cudurkan, iyo sida ey iskaga ilaalin karaan cudurkaan si loo yareeyo faafista cudurka.

In la is baaro waa laasim si loo yareeyo ogaal la'aanta ey qabaan dadka xiriirka wada leh, hadii ey isku galmoodaan iyo hadii ey wada isticmaalaan hal irbad, hadii goor hore la iska baaro cudurkaan waxaa suurtoobeysa in lagu daweeyo qofka daawo dhabar jabisa feyraska wada cudurkaan.

Si loo yareeyo fidista cudurkaan uu ku dhex fido jeelasha iyo waliba dadka isticmaala daroogada, waxaa muhiim ah in Dowlada Kanada iyo Dowladaha kala duwan ey iskugu yimaadaan meel dhexe si eey uga wada hadlaan in la kala badalan karo Irbadda iyo Qalabka lagu nadiifiyo Irbadda.

Muddada soo socota nolosha iyo xaalada caafimaad ee dadka Kanadiiska ah, iyo waliba lacagta is daweyntuba waxay noqon doonaan waxyaalaha keeni doona in heerka fidista ee cudurkan ey gaarto 0%, ayadoo la heli doono talaal iyo daawo.